



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 8aad	Kulanka: 1aad
Taariikhda: 29 Agoosto, 2026	Goobta fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu furmay: 11:10 AM	Saacadda uu xirmay: 11: 40 AM
Shir guddoonka fadhiga: Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare	Guntanka Kulanka: 29 Senator
Martida Kulanka: 1. Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka Marwo Maryan Cali Abukar oo uu wehliyo Maxamed Xasan Nuur Xubin ka mid noqonaysa Guddiga Madaxa Banaan ee Xuquuqda Aadanaha Abukaate 2. Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbadalka Cimiladda Mudane Xuseen Cali Xaaji 3. Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda Mudane Axmed Cismaan Diiriye	Ajedayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Quráanka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Ansixinta Xubin Ka Banaan Guddiga Madaxa Banaan ee Xuquuqda Aadanaha. 4. Akhrinta 1aad Hindise Sharciyeedka Dhisidda Hay`adda Adeegga, Saadaasha Hawada iyo Cimilada. 5. Akhrinta 1aad Hindise Sharciyeedka Amniga saybarka soomaaliya

Furitaanka Kulanka:

Senator Ibraahim Awgaab Cusmaan ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 29 Senator

Aamusnaansho: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, Marwo Maryan Cali Abukar, si ay Golaha uga hor jeediso warbixin ku saabsan hannaanka xulista xubinta ku biiraysa Guddiga Madaxa-bannaan ee Xuquuqul Insaanka. Kaddib warbixinta, Guddoomiyaha ayaa cod u qaaday ansixinta xubinta, waxaana oggolaaday 26 Senator, halka 1 Senator uu diiday, 1 kalena uu ka aamusay.

Intaas kaddib, Guddoomiyaha ayaa u yeeray Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada, Mudane Xuseen Cali Xaaji, si uu u soo bandhigo warbixinta Akhrinta Koowaad ee Hindise-sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Adeegga, Saadaasha Hawada iyo Cimilada, isagoo sharaxay muhiimadda hindise-sharciyeedka.

Ugu dambayntii, Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyadda, Mudane Axmed Cismaan Diiriye, ayaa Golaha la wadaagay warbixinta Akhrinta Koowaad ee Hindise-sharciyeedka Amniga Saybarka Soomaaliya. Guddoomiyaha ayaa waydiiyey Senatarada hadii ay jirto cid qabta waydiin la xiriirta mabaadiida guud ee hindise-sharciyeedyada, kaddibna faray Xoghayaha Guud in labada hindise-sharciyeed loo gudbiyo guddiyada ku shaqada leh.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka
2. Ansixinta Mudane Maxamed Xasan Nuur oo buuxin doona xubin ka bannaan Guddiga Madaxa Bannaan ee Xuquuqul-Insaanka
3. Guddoomiyaha Aqalka Sare ayaa faray maamulka Golaha in hindise-sharciyeedkaan loo gudbiyo Guddiga ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibkooda ugana soo diyaariyaan warbixinta akhrinta 2aad.

Ugu dambayntii Guddoomiyaha Golaha Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray saacaddu markay ahayd 11: 40 AM.

DHAMAAD